

HAGAHA

Goob joogayaasha cunsuriyada ee goobta shaqada

**Sida aad codkaaga u muujin karto haddii aad
markhaanti u eheed cunsuriyadda shaqada**

Hage loogu talagalay dadka goobjoog u ah cunsuriyad ka dhacday goobta shaqada



Waa maxay goobjooge?

Goobjooge waa qof kasta oo markhaati ka ah cunsuriyadda shaqada laakiin aan si toos ah ugu lug lahayn. “Goobjooge firfircoon” waa qof goobjooge ka ah xaalad oo tallaabo qaaday. Goobjoogaha firfircoon ayaa door muhiim ah ka ciyaara ka hortagga midab-takoorka goobta shaqada.

Waa maxay sababta loogu baahan yahay inaad codkaaga muujiso?

Mar kasta oo uu goobjooge firfircoon uu wax ka yiraahdo cunsuriyadda, waxay gacan ka geystaan abuurista goob shaqo oo ka madax bannaan takoorka jinsiyadda waxayna muujiyaan in dhaqanka cunsuriyadda aan la aqbali karin. Marka qofka meesha jooga uusan waxba samayn, waxay si dadban u taageerayaan takoorka.

Si kastaba ha ahaatee, faragelinta si loo joojiyo cunsuriyadda goobta shaqada mar walba ma aha mid toos ah, oo ammaan ah, isla markaasna sahlan. Dhammaan shaqaalaha waa inay aqoon u leeyihiin sharciyada ururada ee ku saabsan anshaxa shaqaalaha iyo sharciga takoorka jinsiyadda si ay u fahmaan doorkooda iyo mas'uuliyadooda marka ay goob joog ka noqdaan cunsuriyadda shaqada

Hoos waxaad ka daalacan kartaa hage loogu talagalay goobjoogaha firfircoon kaas oo ku saabsan waxa ay sameyn karaan haddii ay marqaati ka noqdaan isir takoor ka dhaca goobta shaqada.

Maxaad samayn kartaa?

Marka hore, si taxadar leh u qiimee xaaladda oo tixgeli arrimahan:

1. qof walbaa ma nabad qabaa?
2. maxaa tallaabo ah oo la qaadi karaa?
3. ma loo baahan yahay taageero dibadda ah?



Taageero

Taageerida qofka lagu bartilmaameedsanayo dhaqanka cunsuriyadda ayaa ah waxa ugu muhiimsan ee aad samayn karto ka goobjooge ahaan inta lagu jiro ama ka dib dhacdada isir takoorka ah ee goobta shaqada.

Siyaabaha aad ku taageeri karto qofka lagu bartilmaameedsanayo cunsuriyadda goobta shaqada:

- Hubi in xaalada qofka caadi tahay iyo/ama ammaan yihiin.
- Weydii waxa ay kaaga baahan yihiin, adigoo hadal ahaan si deggan ugu muujinaya taageeradaada.
- Ka caawi inay ka fogaadaan dembiilaha (marka ay nabdoon tahay in sidaan la sameeyo).
- Haddii ay u muuqdaan kuwo jahawareersan ama xaaladu ay ka tan badisay, u bandhig inaad kala hadasho sida aad u fahansan tahay waxa dhacay.
- U sheeg inaad ka caawin doonto inay soo sheegaan wixii dhacay haddii ay rabaan inay saas sameeyaan.
- Ka caawi inay helaan adeegyada taageerada shaqada kuwaas oo bixin kara taageero maskaxeed oo dheeraad ah ama in walaaca laga yareeyo.

Tusaale ahaan: iyadoo koox ku wada sheekeysanayaan online ka ayaa saaxiibad ka socota Afgaanistaan ayaa dadka la wadaagtay sawirka gabar dhawaan u dhalatay, markii ay saas sameysayna maamulahaaga ayaa yiri soo dir 'Mid kale!? Adinku waxaad dhashaan caruur aad u badan. Waxaad fariin u dirtay saaxiibtaa si aad u ogaatid in xaalkeedu fiican yahay, iyo inay rabi lahayd taageero si markaas ay qof kale ugala hadasho arrinka.

Soo faragasho

Faragelinta marka ay wax dhibaato ah ka imaanayn haddii sidaas la sameeyo, in la soo faragaliyo waxa ay gacan ka gaysan kartaa in la dejiyo marxalada, laga hortago dhibaatooyinka mustaqbalka, iyo in laga shaqeyo caafimaadka qofka lagu bartilmaameedsanayo dhaqanka cunsuriyadda. Faragelintu way kala duwan yihiin waxayna ku xirnaan doontaa xaaladda iyo inaad dareemayso ammaan.



Qaababka aad usoo faragelin karto:

- Si deggan ugala hadal ama su'aal ulajeedka iyo/ama dhaqanka dembiilaha.
- La imoow aragti la loolanta aragtida dembiilaha.
- U muuji dembiilaha diidmadaada ama khilaafkaaga.
- U sharax dembiilaha sababta aysan dhaqan ahaan u wanaagsanayn iyo sababta ay muhiim u tahay in la joojiyo.
- Ka raadi taageero saraakiisha xiriirka, kooxaha tixraaca shaqaalaha ama saaxiibada kale ee taageera.

Tusaale ahaan: waxaad maqashay saaxiib shaqo oo ku jira jikada oo ku canaananaya saaxiib Hindi ah "in uu meesha oo dhan ka dhigay meel saliid leh oo ay cuntadooda xun ureyso". Jikada ayaad soo gashay waadna soo kala dhex gashay ka bacdina si degan ayaad dambiiilaha ugu sheegtay in waxa ay ku hadlayaan ay tahay meel ka dhac iyo in qof kastaa xaq u leeyahay in uu qadadiisa ku cuno jikada iyada oo aan la xukmin.

Soo sheeg arinka

Inaad soo sheegto dhacdada ama aad meel ku qorato waa tallaabo muhiim ah oo wax looga qabanayo cunsuriyadda, gaar ahaan haddii dhaqanku uu dhacay wax ka badan hal mar.



Siyaabaha loo soo sheego dhacdooyinka:

- Taageer qofka lagu bartilmaameedsanayo dhaqanka cunsuriyadda adiga oo sida ay wax u dhaceen iyo taariikhda ay wax dhaceen qoraya si loo helo diiwaan. Haddii dhacdadu tahay arin aad u culus, kala hadal qofka inay jeclaan lahaayeen inay arrinta uga dacwoodaan booliiska.
- Qofka la beegsaday waxyaabaha kala duwan oo ay sameyn karaan (gaar ahaan waddo kasta oo qarsoodi ah ama dibadda laga heli karo haddii qofka la beegsaday uusan rabin inuu u wargaliyo maamulka).
- Kala hadal dhacdada maamulaha ama saaxiib ku caawin kara (kaliya haddii qofka la beegsaday uu ku qanacsan yahay inaad saas sameyso, haddii kale waxaad qofka ku taageeri kartaa inay ayagu saas sameeyaan).
- Bixi cadaymo ama markhaanti baadhis/eegid shil.

Tusaale ahaan: Xubin ka tirsan shaqaalaha Ummadaha Koowaad (First Nations) ayaa si qarsoodi ah kuugu sheegay inay la kulmeen aflagaado afka ah oo uga timid saaxiib kale taas oo socotay muddo dhowr bilood ah ka bacdina wuxuu ku weydiistay taageeradaada si ay u soo sheegaan dhaqanka cunsuriyadda. Waxaad sharaxdaa sida ay usoo sheegi karaan hab-dhaqanka, ka caawi inay diiwaan geliyaan dhacdooyinka kala duwan intii macquul ah, oo u dhaqan sidii qof taageeraya marka ay soo sheegaan dhacdooyinka.

Maxaa xiga oo dhacaya?

Inaad noqoto goobjooge firfircoon maaha oo kaliya inaad ka hortagto cunsuriyadda goobta shaqada markaad aragtay un, laakiin waa dhammaan noocyada cunsuriyadda.

Cunsurinimadu way ka dhex jiri kartaa machadyadayada iyo nidaamyada inta badana wax sahlan maaha in jawaab laga bixiyo dhacdooyinka goonida ah. Goob-joogayaashu waa inay ka hadlaan dhibaatooyinka nidaamka ama ururradu sameeyaan marka ay ogaadaan, sida sharciyada ama shuruudaha aan cadaalad ku ahayn dhammaan dadka.

Goob-joogayaashu waa inay sidoo kale dhiirigeliyaan oo ay xoojiyaan dadka kale si ay u hadlaan oo ay uga dhaadhiciyaan ururkooda inuu noqdo mid ka soo horjeeda cunsuriyadda.

**Wixii macluumaad dheeraad ah, soo dejiso Guddiga
Tilmaamaha: Takoorka jinsiyadeed ee goobta shaqada
waxaa laga heli karaa [humanrights.vic.gov.au/resources](https://www.humanrights.vic.gov.au/resources)
ama iyada oo loo marayo koodhka QR.**

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay hagid ahaan kaliya. Ma aha beddelka talo sharci.



Nala soo xiriir

Khadka weydiinta	1300 292 153 ama (03) 9032 3583
Fakis	1300 891 858
Gudbinta Codka NRS	1300 555 727 ka dibna sheego 1300 292 153
Turjubaano	1300 152 494
limaylka	enquiries@veohrc.vic.gov.au
Mareegta	humanrights.vic.gov.au
Nagala soco Twitter ka	twitter.com/VEOHRC
Facebook-ga naga raadi	facebook.com/VEOHRC

[humanrights.vic.gov.au](https://www.humanrights.vic.gov.au)